Haddaad dooneyso in la qiimeeyo waxbarashadaada

Buug ka hadlaya qiimeynta tacliinta sare iyo waaya-aragnimada xirfadeed ee dalalka kale

INTEGRATIONSVERKET

Haddaad haysato waxbarasho jaamacadeed oo shisheeye? Akhriso halkaan!

Qoraalkaani wuxuu khuseeyaa cidda haysata waxbarasho jaamacadeed ama xirfad dal shisheeye oo doonaya in aqoontooda loo qiimeeyo. Qiimeyntaas micneheedu waxaa weeye in aqoontaada la darso oo la barbardhigo aqoonta iyo xirfadda u dhiganta ee Iswiidhishka. Kolka la qiimeeyo kadib waxaa lagu siin doonaa caddayn idan-xirfadeed oo aad isticmaali doonto kolka aad shaqo ama waxbarasho raadsaneyso. Caddayntani waxa weeye mar horreysa tusaale lagu dhiirrigelinayo shaqa-bixiyayaasha iyo ururada shaqaalaha in ay tixgelin siiyaan kolka shaqaale la qorayo.

Waxaad boggagga hoos ku qoran ka ogaaneysaa meelihii aad la xiriiri lahayd iyo wixii aad samayn lahayd si shahaadadaada loo qiimeeyo. På följande sidor får du veta vart du ska vända dig och hur du ska gå tillväga för att få din examen värderad. Haddiise aad shahaado sare ka wadato dal ka mid ah dalalka EES/EU (* daftar sheegaya dalalka ururadaan ka tirsan), waxaa lagu dhaqmayaa xeerar kale. Waxayna ku qoran yihiin bogga 8.

Waxaad u baahan tahay warqad codsi

Haddaad dooneyso in shahaadadaada waxbarashada sare laguu qiimeeyo, waxaa ugu horreyntii la xiriireysaa mid ka mid ah meelaha hoos ku qoran:

1 xafiiska shaqada (Arbetsförmedlingen),
2 xerada qaxootiga (Flyktingförläggning),
3 sarkaalka talasiinta waxbarashada ee dugsiyada sare iyo waxbarashada dadka waaweyn (Studie- och yrkesvägledare),
4 xafiiska talasiinta waxbarashada ee jaamacadaha (Studievägledare),

---

* Dalalka Midowga Yurub: Beljan, Danmaarki, Finlaandi, Faranis, Giriik, Irlaindi, Talyaani, Luksenbuurgi, Holan, Bortuqaal, Isbeyn, Biritaaniya, Iswiidhan, Jarmal, Ostariya
Dalalka EES: Islaandi, Liishtaanistayn, Noorwey, Iswitserlandi.

5 maamulka qaabbillaadda qaxootiga ee degmooyinka ama (Kommunal flyktingmottagning)
6 xafiiska hawlaha ajnebiga ee degmooyinka (Invandrarbyrå).

Waxaa halkaas lagaaga kaalmeynayaa sidii aad u buuxin lahayd warqadaha codsiga. Haddaba, hy'adda aad codsigaaga u gudbineysaa waxay ku xiran hadba waxa xirfaddada waxbarasho tahay. Waxaad boggagga soo socda ka akhrisan kartaa hay'adaha iyo xirfadaha xilku ka saaran yahay. Mar walba waxaad arrintaa wax ka weyddiineysaa meesha aad warqadda codsiga ka hesho.

Soo gudbi shahaadooyinka iyo turjumiddooda

Waxaad warqadda codsiga ku soo lifaaqeysaa nuqulo saxiixan ee caddaynta imtixaanka, shahaadada, iyo tusmada maaddooyinka iyo turjumiddooda oo uu turjumay turjubaan idan haysta. Fiira gaara: Haddii afka asalka ahi yahay Ingiriis, Faransiis, Jarmal ama afafka Yurubta waqooyi (daanishka, noorweyjiga, fiinishka ama islaandishka), u ma baahnid inaad turjumiddooda soo gudbiso. Haddii aad wadato qoraallo kale oo waxbarashadaada ku saabsan, sida manhajka waxbarashada, waa in aad kuwaasna soo gudbisaa. Qiima weyn ayeyna u leeyihiin qiimeynta waxbarashadaada.

Habka codsigu u dhacayo

Habka qiimeyntu u dhacayso iyo waqtiga ay qaadaneyso waa ay ku kala geddisan yihiin hay'adaha. Waxaa mararka qaarkood dhici kara in aad u baahato inaad samayso imtixaan af ama qoraal ah, inaad meel ku samayso shaqo tababar ah ama inaad bilowdo waxbarasho dhammaystir ah. Haddaba, si aad u ogaato waxa lagaaga baahan yahay, la xiriir hay'adda qaabbilsan qiimeynta waxbarashadaada.

1 *Soo turjum shahaadooyinkaaga*. Haddii shahaadooyinkaagu ay ku qoran yihiin af aan ka ahayn Ingiriis, Faransiis och Jarmal ama mid ka mid ah afafka Yurubta waqooyi waa in shahaadooyinkaaga u geysaa oo ka soo turjuntaa turjubaan idan haysta. Sida ugu fududi waxaa weeye adigoo u geeya shirkad wax turjunta oo aad cinwaankooda ka heleyso boggagga huruudda ah ee buugga taleefanada.

Ururka turjubaanada idmani waxay hayaan cinwaanada turjubaanada, waxaadna ka heleysaa bogga Internet-ka http://www.eurofat.se. Waxaad la xiriireysaa xafiiska shaqada sidii aad uga la hadli lahayd sidii dhaqaale ahaan lagaaga caawini lahaa turjumiddaas.

2 *Buuxi warqadda codsiga*. Ha illaawin in aad dirto dhammaan shahaadooyinka iyo caddaymaha shaqo!

3 *Dhammaystirada*. Waxaa laga yaabaa in aad samayso imtixaan af iyo qoraal ah ama aad bilowdo waxbarasho dhammaystir ah.

4 *Ka wardhawr*. Waqtiga qiimeyntu wuu kala duwanaan karaa. Warbixin dheeraad ah kala xiriir hay'adda ku xil leh.

5 *Kolka jawaabtu timaaddo*. Jawaabtu waxay noqon kartaa caddayn qiimayn ama diidmo laguugu diraayo waxbarasho dhammaystir ah.

Caddayntu waa mid la isku barbardhigayo waxbarashada shisheeye iyo tan iswiidhishka oo u dhiganta iyo sidii ay tusaale ugu noqon lahayd shaqa-bixiyayaasha.

Aqoonsiga shahaadooyinka jaamacadeed iyo xirfadaha barayaasha – Wakaaladda Tacliinta Sare (Högskoleverket)

Waxaa badanaaba codsiyadaas guddooma Wakaaladda Tacliinta Sare. Waxay wax ka qabtaan shahaadooyinka waxbarashada shisheeyaha oo aan shatiga u baahnayn. Waxay kaloo mas'uul ka yihiin xirfadda barayaasha. Waxay Wakaaladda Tacliinta Sare si toos uga jawaabta su'aalaha ay soo wyddiistaan shaqa-bixiyayaasha iyo hay'adaha dowladda oo ku saabsan waxbarashooyinka dalalka kale.

Haddaad dooneyso in laguu qiimeeyo waxbarashadaada sare ee baranimo waxaad bixineysaa lacag khidmad ah, wixii kaloo qiimeyn ahise waa bilaash. Si loo bixiyo caddayn waa in ay waxbarashada baranimada shisheeye ahaataa mid u dhiganta waxbarashada baranimada hadda iyo kuwii hore ee Iswiidhan. Waxaa kaloo qiimeynayaa ku soo shaqaynta xirfadda baranimo. Intaas waxaa ka baxsan oo la isku xirayaa in la haysto shahaado af iswiidhishka oo dhiganta tan dugsiyada sare, sida Iswiidhishka B (Svenska B), af -Iwiidhishka

oo aflabaad ah B (Svenska som andraspråk B), imtixaanka TISUS (imtixaan af iswiidhishka loo galo oo loogu talagalay waxbarashada jaamacadaha).

U qalanta jaamacadaha iyo kulliyadaha Iswiidhan – Hay'adda Arrimaha Tacliinta Sare (Verket för högskoleservice/VHS)

Haddii aad dooneyso in waxbarashadaada loo qiimeeyo in aad Iswiidhan waxbarasho sare kaga bilaabi karto, waxaad la xiriireysaa Hay'adda Ariimaha Tacliinta Sare. Waxay qiimeyntoodu warbixin ka dhiibeysaa sida ay waxbarashooyinkaas oo la barbardhigay kuwa dugsiyada Iswiidhan ay u yihiin kuwo lagu bilaabi karo waxbarasho sare. Waxaa kaloo qiimeyntaas muhiim u ah shahaadooyinka caddaynaaya waxbarashooyinka jaamacadeed iyo kuwa u dhigma oo aad dalkaaga ka soo dhigatay.

Uma baahnid in laguu qiimeeyo waxbarashooyinkii aad horay u soo dhigatay haddii aad dooneyso inaad waxbarasho ka bilowdo jaamacad ama kulliyad iswiidhish ah, laakiin waxaa wanaagsan inaad soo gudbiso wixii qiimeyn aad horey u sameysay kolka aad waxbarasho sare dalbaneyso. Qiimeyntu waxay qeexeysaa qiimaha shahaadada waxbarashada shisheeyuhu leedahay kolka waxbarasho dalbaneyso.

Qiimeynta VHS waa mid lacag la'aan ah (bilaash)

Waxbarashooyinka caafimaadka shisheeyaha ee xirfadaha sharciyeysan – Guddiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada (Socialstyrelsen/SoS)

Haddii aad leedahay waxbarasho xirfadaha caafimaadka, waxaa taas qiimeynaya Guddiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada (SoS). Wuxuu guddigu qiimeynayaa aqoonta waxbarasho, wuxuuna go'aan ka gaarayaa shuruudaha shatiga xirfadeed iyo bixinta shatiga xirfadeed. Waxaa laga yaabaa in lagaaga baahdo in aad samayso dhammaystir ah inaad ka qaybgasho barnaamij u diyaariyo Guddiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ama in aad dhigato koorsooyin jaamacadeed, taasoo ku xiran hadba dalka aad waxbarashada ku soo dhigatay. Waxaadse xusuusnaataa in Guddiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka

Bulshada uu qiimeynaayo oo qura waxbarashooyinka la dhammaystay. Haddiise aad dalkaaga ka wadato waxbarasho qabyo ah amase aadan wadan shahaado waxbarasho, waxaa markaa khasab kugu noqoneysa in aad bilowdo waxbarasho jaamacadeed oo dhammaystir ah.

Xirfadahaan ayuu Socialstyrlesen u xilsaaran yahay:

Xirfadaha shatiga leh:

Farmashiiste
Aqoonhayanka dhaqancelinta jirka
Ummuliso
Aqoonyahanka xanuunka dhabarka iwm
Aqoonyahanka codka iyo hadalka
Dhakhtar
Naprapat (dhakhtar jirka dadka ku daweeya dalliig, riixriix iwm)
Aqoonyahanka muraayadaha indhaha
Dhakhtarka cilmi-nafsiga
Aqoonyahanka tababarka maskaxda
Daawa-gade
Kalkaalye raajo
Aqoonyahanka daryeelka dhaqdhaqaaqa jirka
Aqoonyahanka fisiigga isbitaalka
Kalkaaliye caafimaad
Kalkaaliye daryeel ilko
Dhakhtar ilko

Xirfado dhawran oo aan shati u baahnayn

Aqoonyahanka maqalka
Baare daawasamayn
Aqoonyahan nafaqo
Aqqonyahanka lafadhisidda

Codsayaashu waxay Guddiga Caafimaadka iyo Daryeelka Bilshada kala xiriiri karaan wixii kharash ah.

Xirfadaha daryeelka caafimaadka xoolaha – Wakaaladda xannaanada xoolaha iyo beeraha qaranka (Statens Jordbruksverk/SJV)

Wakaaladda xannaanada xoolaha iyo beeraha qaranku iya-

doo la shaqayneysa Jaamacadda beeraha waxay shati siisaa dhakhtarada xoolaha oo waxbarasho sare oo shisheeye wata. Waxayna taas dhacdaa marka la soo maro waxbarasho dhammaystir ah oo loogu tala galay dhakhtarada xoolaha oo ajnebiga ah (TUVE). Waxay waxbarashadu ka kooban tahay koorsooyin, tababaro, imtixaan af iyo qoraal ah iyo shaqo xirfad-kororsi ah. Detta sker främst efter en tilläggsutbildning för utländska veterinärer (TUVE). Utbildningen omfattar kurser, praktik, teoretiska och praktiska prov samt praktiktjänstgöring. Intaan la bilaabin koorsada waxaa la isku xirayaa in lagu najaxay af-iswiidhishka caafimaadka derajada 2 (Sjukvårdssvenska 2)

Naakhuude iyo xirfadaha kaloo badda – Wakaaladda Gaadiidka Badda (Sjöfartsverket)

Haddii aad wadato waxbarasho naakhuude ama xirfado kaloo u dhigma, waxaad la xiriireysaa Wakaaladda Gaadiidka Badda. Waxayna qiimeeyaan abbaanduule markab, badmaax, ilaalo markab, madaxa mishinka markabka, mishinwadaha 1aad iyo mishinwadaha hoose. Waxbarashooyinka la soo dhigtay waa in ay buuxinayaan shuruudaha kalfadhigii ururka gaadiidka dunida, iyo qaraarkii la cusbooneysiiyey sannadkii 1995 oo qeexaya shuruudaha waxbarashada shaqaalaha badda, shahaadooyinka iyo ilaalinta hawlaha badda (STCW 95). Xusuusnow in haddii aad dooneyso inaad naakhuude ka noqoto markab iswiidhish ah lagu xiri karo in aad mar hore haysato jinsiyadda iswiidhishka.

Qiimeyntu waa mid lacag la'aan ah.

Xirfadaha hawada sare – Wakaaladda Gaadiidka Cirka (Luftfartsverket/ LFV)

Wakaaladda Gaadiidka Cirku waxay qiimeysaa waxbarashooyinka xirfadaha hawada sare, sida duuliye iyo farsamayaqaan diyaaradeed. Waxaa duuliyaha lagu xirayaa: In Maamulka kormeerka gaadiidka cirku oggolaado in shahaadooyinka shisheeyaha lagu shaqeeyo waqti xaddadan taasoo kolka hore ku xiran in cidda shahaadada wadataa buuxiso shuruudaha lagu xirayo shahaadooyinka iswiidhishka.

Waxaa mararka qaarkood la isku xiri karaa in soo dhammaystiro shahaadooyin, waaya-arahnimo iyo waxbarasho.

Shahaadooyinka farsamayaqaanka diyaaradahase mararka qaarkood waa oggolaadaa iyadoo aan la isku xirin dhammaystir dheeraad ah. Taasina waxay khuseysaa shahaadooyinka qaran oo ay bixiyeen hay'adaha Noorwey iyo Daanmaarki, iyo kuwa lagu magacaabo JAR 66 AML.

Ma waxaad ka timid dal ka tirsan dalalka EES/EU?

Waxaa waxbarashooyinka dalalka EES/EU lagu qiimeeyaa xeerar kale. Waxay Iswiidhan iyo dalalka Midowga Yurub, Islaandi, Noorwey, Liishtaanistayn iyo Iswitserlandi hoos yimaadaan xeerka EG oo oggolaanaya waxbarashada iyo aqoonta xirfadaha sharciyesan. Xirfadaha sharciyeysan micnehoodu waxa weeye in aad sharci ahaan haysato idan, shati iyo wax u dhigma si aad xirfadaada ugu shaqeyso. Kuwaasna waxaa tusaale ahaan ka mid ah harmashiiste, injiyeer hindise dhismo, ummuliso, dhakhtar iyo kuwa kale. Gundhigga xeerku waxa weeye in qofka ruqsad u haysta inuu xirfadiisa kaga shaqeeyo dalkiisa hooyo, uu kaga shaqayn karo dal kale oo ka tirsan EU/EES.

Haddii aad waxbarasho ka wadato dal ka tirsan EU/EES aadna dooneyso inaad Iswiidhan ugaga shaqayso xirfad sharciyeysan, waa inaad kolka hore ka codsataa hay'adda ku xil leh qiimeyn iyo ruqsad aad ku shaqayso. Fiiri liiska hoos ku qoran. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan ciddii aad xiriiri lahayd waxaad ka heli kartaa Hay'adda Tacliinta Sare, www.hsv.se .

Hay'adaha iyo xafiisyada ku xil leh:

Qareen (89/48/EEG)
Sveriges Advokatsamfund
Box 27321
102 54 Stockholm
tel. 08-459 03 00, fax: 08-660 07 79
e-post: info@advokatsamfundet.se
http://www.advokatsamfundet.se

Dillaalka guryaha (92/51/EEG)
Fastighetsmäklarnämnden

Kammarkollegiet
Box 2199
103 15 Stockholm
tel. 08-700 08 00
fax: 08-700 09 99
e-post: fmn@kammarkollegiet.se
http://fastighetsmaklarnamnden.se

Barayaasha dugsiyada dowladda (89/48/EEG)
Högskoleverket
Box 7851
103 99 Stockholm
tel. 08-56 30 85 00
fax: 08-56 30 86 50
e-post: naric-enic@hsv.se
http://www.hsv.se

Farsamayqaan diyaarad (92/51/EEG)
Luftfartsverket
601 79 Norrköping
tel. 011-19 20 00
fax: 011-19 25 75
e-post: luftfartsverket@hk.lfv.se
http://www.lfv.se

Xisaabxir (89/48/EEG)
Revisorsnämnden
Karlavägen 104
Box 24014
104 50 Stockholm
tel. 08-783 18 70
fax: 08-783 18 71
e-post: rn@revisorsnamnden.se
http://www.revisornamnden.se

Madaxa gurmadka (89/48/EEG) abbaabuulaha guutada gurmadka, dabdamiye, sarkaalka kormeerka kahortagga dabka, sarkaalka safeeya haraaga dabka (92/51/EEG)
Räddningsverket
651 80 Karlstad

tel. 054-10 40 00
fax: 054-10 28 89
e-post: srv@srv.se
http://www.srv.se

Injineer bad,
kabtan markab (89/48//EEG),
koronta-yaqaan markab,
mishinwade A iyo B,
naakhuude xigeen A iyo B,
naakhuude A iyo B (92/51/EEG)
Sjöfartsverket
601 78 Norrköping
tel. 011-19 10 00
fax: 011-10 19 49
e-post: sjofartsverket@sjofartsverket.se
http://www.sjofartsverket.se

Aqoonhayanka dhaqancelinta jirka, aqoonyahanka maqalka, baare daawasamayn, aqoonyahan nafaqo, aqoonyahanka codka iyo hadalka, aqoonyahanka muraayadaha indhaha, injineerka lafadhisidda, dhakhtarka cilmi-nafsiga, aqoonyahanka tababarka maskaxda, kalkaaliye raajo, aqoonyahanka fisiigga isbitaalka, aqoonyahanka daryeelka dhaqdhaqaaqa jirka, aqoonyahanka xanuunka dhabarka, (89/48/EEG), daawa-gade, kalkaaliyaha fayadhawka ilkaha, kalkaaliyaha dayeelka caafimaadka ilkaha (92/51/EEG)
Socialstyrelsen
106 30 Stockholm
tel. 08-55 55 30 00
fax: 08-55 55 34 20
e-post: socialstyrelsen@sos.se
http://www.sos.se

Baraha gaadiidka (92/51/EEG)
Vägverket
781 87 Borlänge
tel. 0243-750 00
fax: 0243-758 25
e-post: vagverket@vv.se
http://www.vv.se

Bare jaamacadeed
Ma jirto hay'ad ku xil leh. Waxaa qiimeynta sameeya shaqa-bixiyaha (jaamacadaha iyo kulliyadaha) xilliga shaqa-qorista.

Hay'adaha Iswiidhan ugu xil leh qaybaha mucayanka ah

Injineer hindise dhismo
Högskoleverket
Box 7851
103 99 Stockholm
tel. 08-56 30 85 00
fax: 08-56 30 86 50
e-post: hsv@hsv.se
http://www.hsv.se

Dhakhtar xannaano xoolo
Jordbruksverket
551 82 Jönköping
tel. 036-15 50 00
fax: 036-19 05 46
e-post: jordbruksverket@sjv.se
http://www.sjv.se

Farmashiiste, ummuliso, dhakhatar, kalkaaliye daryeel caafimaad, dhakhtar ilko
Socialstyrelsen
106 30 Stockholm
tel. 08-55 55 30 00
fax: 08-55 55 34 20
e-post: socialstyrelsen@sos.se
http://www.sos.se

Warbixinta qaraarka EG
http://europa.eu.int/comm/internal_market/en/people/qualif/codesv.pdf
(handbok och uppförandekod)
http://europa.eu.int/comm/internal_market/en/people/qualif/guidesv.pdf

Haddaad dooneyso in la qiimeeyo waxbarashadaada

Haddii aad dooneyso in la qiimeeyo waxbarashadaada iyo waaya-aragnimadaada xirfadeed oo loo qiyaaso kuwa Iswiidhishka waxay gundhig u tahay sidii aad u heli lahayd shaqo u qalanta shahaadooyinkaaga. Hay'adda Isdhexgalku waxay soo saartay iyadoo kala kaashanaysa hay'adaha kale qoraal qeexaya sida loo qiimeynayo waxbarashooyinka dalalka kale. Qoraalkana waxaa ku cad qaybaha hay'ad walba xilku ka saaran yahay iyo habka wax loo qiimeynayo. Waxaa hoos qoran cinwaanada hay'adaha kala geddisan.

Waxaad waaxda qaybinta ka dalban kartaa af Ishwiidish qoraalo dhawr ah:
Migrationsverket
Distributionen
601 70 Norrköping

Waxaan kaloo qoraaladaan ku turjunnay afaf Igiriiska, Faransiiska, Isbaanishka, Bosniga/Serbiga/Kuruwaatiga, Carabiga, Bershiga, Turkiga, Ruushka iyo Suraaniga. Laakiin ma jiraan iyagoo warqado ku daabacan, waxaadse ka soo qaadan kartaa iyagoo qaabka pdf ah cinwaankayaga Internetka: www.integrationsverket.se. Waxaa kaloo halkaa laga heli karaa iyagoo ku qoran af-Iswiidhish fudud.

INTEGRATIONSVERKET

Guldringen 58, Box 633, 601 14 Norrköping
Tel. 011-36 13 00, Fax 011-36 13 01
integrationsverket@integrationsverket.se • www.integrationsverket.se